**Hordhac**
20 sano, Isbitaalka Keysanay ee Muqdisho ayaa bixinayey adeeg caafimaad oo qaliinada dhaawacyada degdega ah oo ay si isku mid ah uga faaiidaysanayeen shacabka soomaaliyeed iyo dagaalyahanaduba. Hawsha isbitaalka Keysanay muhiim bay u tahay dadka Muqdisho ku nool, 20kii sano ee la soo dhaafay in ka badan 216’000 oo qof, oo ay ku jiraan 30’000 oo dhaawacyo hub sababay ayaa lagu daweeyey.Sawiraadan waxay tuseysa isbitaalka wuxuu soo mare 20ka sano oo lasoo dafey.




SOMALIE
**Muqdisho. Isbitaalka Keysanay.**
20 sano ilaa hada, isbitaalka Keysanay ee waqooyiga Muqdisho waxaa lagu daweeyaa dadka guud ahaan, gaar ahaan kuwa dhaawacyadu dagaalada ka soo gaaraan shacab ama dagaalyahano. Isbitaalka waxaa wada Bisha Cas ee Soomaaliyeed oo ay taageerto Laanqayrta Cas ee Caalamiga ah. Qayb qaliin oo cusub ayaa horaantii sanadka loo dhamastiray isbitaalka lana furay sanad guuradii 20aad ee isbitaalka.

*V-P-SO-D-00018-18* 03/1991
interne © SIPA PRESS/NICOLAS, Jose



SOMALIE
**Mogadishu. Keysanay hospital.**
" Waa maalin muhiim u ah ICRC iyo SRCS, waana maalin shucuur gaar ah ii leh. Sanaadka 1992 ee Keysaney la furey waan joogey maantana waxa la fureya qaybta qaliinka". Ayey tiri Randi Jensen oo ah kalkaaliso ICRC xaafiska Soomaliya maalintii sanad guurada 20aad ee aasaaskii isbitaalka Keysaney."Waxan ku faraxsanahay shaqadi aan heyney sanadihii aan soo dhafney iyo wadashaqeynta shaqalaha SRCS "

*V-P-SO-N-00065-19* 09/11/1992
public © CICR/MCDOUGALL, Fiona



SOMALIE
**Mogadishu North. Keysanay hospital.**
Isbitaalka waxaa la furay 1992dii si loogu daweeyo dadka dagaalada ku dhaawacma ee waqooyiga magaalada Muqdisho kaas oo qaada ilaa 90 sariirood. ICRCda ayaa dib u habayn u ku samaysay isbitaalka oo markii hore loogu tala galay xabsi una rogtay isbitaal, kaas oo sameeya ilaa 2’500 oo qaliin sanadkiiba.

*V-P-SO-D-00026-03* 01/1993
public © CICR/BOUSSEL, Pierre



SOMALIE

**Moqdishu :- Isbitaalka keysanay**

Isbitaalka waxaa la furay 1992dii si loogu daweeyo dadka dagaalada ku dhaawacma ee waqooyiga magaalada Muqdisho oo aan horey u lahayn isbitaalo caafimaad iyo qaliin. ICRCda ayaa dib u habayn u ku samaysay isbitaalka oo markii hore loogu tala galay xabsi balse loo bedelay isbitaal, iyadoo la geeyey shaqaale caafimaad, gaar ahaan kuwa qaliinka

*V-P-SO-D-00026-13*
public

01/1993
© CICR/BOUSSEL, Pierre



SOMALIE

**Isbitaalka Keysanay. Daryeelka bukaanka iyo caruurta**

Ilaa 1994tii waxaa isbitaalka waday shaqaale soomaali ah oo ay qoratay Bisha Cas balse ICRCdu tababartay. ICRCdu waxay siisaa isbitaalka kaalmo caam ah oo ay ka mid tahay bixinta mushaarka shaqaalaha, tababaro iyo daweynt bukaanada. Ilaa 220 bukaan qaliin ah ayaa gasha isbitaalka bishiiba, kuwasoo in ka badan 100 ay yihiin dhaawacyo hub keenay.

*V-P-SO-D-00032-05*
public

01/09/1995
© CICR/NOSTEN, Anne



SOMALIE

**Muqdisho. Isbitaalka Keysanay. Daryeel ilmood ee isbitaalka**

Ilaa iyo markii la furay isbitaalka waxaa lagu daweeyey 30’000 oo dhaawacyo dagaal ah oo qayb ka ahaa 216’000 oo bukaano kale ah. La talinta bukaanku waxay joogtaa 1 dollar ama 22’000 oo SoSh. Sariirta ama jiifka habeenkii waa 2 dollar, iyo 4 dollar qolka ama sariirta gaarka ah qaybta gaarka ah oo ka kooban 13 sarirood. Boqolkii soddon bukaanku waa dad faqri ah oo aan xitaa lacagtaas yar bixin karin.

*V-P-SO-E-00184*
public

07/12/2006
© CICR/SCHAEFFER, Benoît

SOMALIE



**Muqdisho. Isbitaalka Keysanay**
20kii sano ee ugu dambeeyey, Keysanay waxay dareemaysay culaabta dagaalada hubaysan, marka lagu daro in marar badan isla isbitaalka xabado iyo madaafiici ku soo dhacday. Rabshadaha ka dhanka ah goobaha, shaqaalaha caafimaadka iyo bukaanada ayaa ah caqabad wayn oo maanta haysata hawlaha bani’aadminimada. Hawlaha muhiimka ah ee ay bixiyaan goobaha caafimaadku sida Keysanay ayaa ka dhiga lama huraan in sharciga caalamiga ee bani’aadminimadu ilaaliyo baraha caafimaadka, shaqaalaha iyo bukaanadana la ixtiraamo waqti kasta.

*V-P-SO-E-00186*
public

07/12/2006
© CICR/SCHAEFFER, Benoît

SOMALIE




**Muqdisho. Ilinka qolka gargaarka degdega ah.**
Marka la eego sharciga caalamiga sharciga caalamiga ee bani’aadminimadu waa lama huraan in ilaaliyo baraha caafimaadka, shaqaalaha iyo bukaanadana lana ixtiraamo waqti kasta. Kooxaha dagaaladu ka dhexeeyaan waa inay ixtiraamaan goobahaas, sida isbitaalada, iyo baraha kale ee caafimaadka. Dadka colaada ku lugta lihi waa inay sameeyaan wax kasta oo ay ku badbaadinayaan goobahaan, dadka caafimaadka ka shaqeeya iyo dadka shacabka ahba.

*V-P-SO-E-00189*
public

07/12/2006
© CICR/SCHAEFFER, Benoît

SOMALIE



**Takhtar dad wax baraya**.

Takhtar baa cashar siinaya shaqaalaha kale ee caafimaadka, kalkaaliyeyaasha ardayda jaamacada caafimaadka isaga oo kala hadlaya kala hormarinta dhaawacyada sida ay u kala daran yihiin. Isbitaalka Keysanay waxaa wada Bisha Cas ee Soomaaliyeed

*V-P-SO-E-00313*
public

09/11/2007
© CICR/LOUIS, Virginie

SOMALIE



**Sawirka derbiga Isbitaalka kuyaalo**

Waxaa inoo suura geliyey in aan ku shaqayno xaaladan adag mudadan dheer waa mabda’eena iyo qaab shaqeedkeena ku salaysan dhexdhexaadnimada iyo eexasho la’aanta, ayuu yiri yusuf Xasan, Agaasimaha Isbitaalka  ee ilaa 2004tii.

Isbitaalka Keysanay wuxuu qaabilaa bukaanada oo dhan iyada oo aan loo eegayn diin, qabiil iyo aragti siyaasadeed. Adeega isbitaal Keysanay waa u muhiim bulshada muqdisho. 20kii sano ee la soo dhaafay waxaa lagu daweeyey Keysanay 216’000 oo qof, oo ay ku jiraan 30’000 oo bukaan ay dhaawacyo ka soo gaareen hubka.

*V-P-SO-E-00314*
public

09/11/2007
© CICR/LOUIS, Virginie

SOMALIE



**Muqdisho, Isbitaalka Keysaney. Qolka cusub ee qaliinka oo la furay 2dii febraayo 2011**

In kasta oo si joogta ah loo dayactirayey qolkii hore ee qaliinka misana waa uu xamili waayey hawlaha iyo qaliimada mar walba soo kordhayey ee isbitaalka iyo qalabka qaliinka oo duqoobay.Dhismaha cusubi wuxuu ka kooban yahay hal boosaneero, qol qaliin kaas oo leh meelo kala duwan oo laga soo galo, hal farmshiye, qolka nasashada, qolka shaqaalaha, qolka dhar bedelashada iyo qol nadaafadeed.

public

01/2012
© CICR

SOMALIE



**Muqdisho, 2012. Gudaha Qolka cusub ee qaliinka**

"Marki hore waxaan dareemayey in  aanan isbitaal ka shaqayn balse xabsi. Isbiitalka hada sificaan ayuu u habeeysan yahay.
"said the hospital's director, Yusuf Hassan Mohamed.

public

01/2012
© CICR

SOMALIE



**Muqdisho, 2012. Qolka cusub ee qaliinka isbitaalka Keysaney**
Nolosha shaqalaha iyo bukaanka siweyn ayay isu bedeshe kadib markii la furey qeybta cusub ee qaliinka.

public

01/2012
© CICR

SOMALIE



**Mogadishu, 2012. Qolka kabashada qaliinka ee isbitaalka Keysaney**

Qeybta cusub waxa kujira qolka kasoo kabashada qaliinka.

public

01/2012
© CICR

SOMALIE




**Muqdisho, 2012. Illinka isbitaalka Keysaney**

Isbitaalka Keysaney waxuu kuyala waqoyi bari ee magalada Muqdisho halkaso hore u ahayd xabsi. .

public

01/2012
© CICR